



Qoysaskayaga Qaaliga ee DDP,

Cago-jugleynta Isgaarsiinta Dheereysa waxaa weeyaan cago-juleynta ama dhibaateynta ka dhacda marka la isticmaalaya khadadka online. Cago-jugleyntani waxa ay ka dhacdaa baraha ay bulshadu ku xidhiidho, kuwa fariimaha qoraalka ah la isugu diro, email, ciyaaraha lagu ciyaaro kumbuyuutarka ama faalooyinka. Cago-jugleynta isgaarsiinta dheereysaa waxay la xidhiidhi kartaa kutir-ku-teen ama sawiro qof la soo dhigay taariikh-nololeedkiisa ama cid kale loo gudbiyey si ay u arkaan, ama abuuritaanka koox ama bog si qofkaas loo dareensiyo in qofkaas laga tagay. Sababtoo ah fariimaha Cago-jugleynta Isgaarsiinta dheereyaa waxa si degdeg ah loogu diri karaa dad fara badan waqti kooban, taasi oo sababi karta in ay gaadhsiiso caruurta dhaawac mug weyn. Waxaa jira tilmaamo fara badan iyo waxyaabo waalidiinta ka caawin kara sidii ay u ogaan lahaayeen ugana qeybqaadan lahaayeen hawlaha caruurtoodu internet-ka ay ka qabanayaan. Hadafkeyaga ayey tahay inaan qoysaska u fidino macluumaad caawin kara oo ku saabsan su'aalaha inta badan la iska weydiyo ee la xidhiidha feejignaanata internet iyo cago-jugleynta isgaarsiinta dheereysa.

### **Sidee ayaan u kormeeri karaa Ilimahayga hawlihiisa internetka?**

Waa fikrad fiican in aad kumbuyuterka uu yaalo meelaha la wada joogo oo guriga ah, halkaas oo si dhib yar aad u arki karto waxa ilmahaagu uu fiirinayo. Kala hadal ilmahaaga waqtiga iyo goobta telefoonadooda gacanta ay ku isticmaali karaa. Waxa fiican inaad u dejiso xeerarka masuuliyada isticmaalka internetka iyo telefoonada gacanta iyadoo qoraal ahaan ilmahaaga aad kaga qeybqaadan karto qoritaanka tilmaamaha qoyska. Waxaad tixgelin siisaan in aad isticmaashaan hab adag oo gaar idinka idiin ah oo aad ku adkeyneysaan cidii geli karta iyo cidii wax ku qori karta boga ilmahaaga. Sidoo kale waxaad ogsoonaataa in aad isticmaasho software-ka lagu shaandheeyo ama lagu ilaaliyo. Waalidiintu waa xaddeyn karaan booqashada boggaga gaar ah, iyagoo isticmaali kara inay shaandheeyaan email-da, fariimaha degdeg ah, iyo kuwa lagu sheekeystaba. Waalidiintu waa in ay xaqiijiyaan in ay hayaan furaha sirta ah ee ardeydoodu ku galaan dhammaan baraha lagu sheekeysto. Telefoonada gacantu sidoo kale waxay leeyihiin hab gaar ah oo si khaas ah loo isticmaali karo si nabadgelyo leh una xakameyn kartid, sidoo kale kambaniga telefoonka ku siiyey wuxuu kaa caawin karaa doorashada u gaar ah ilmahaaga.

### **Sidee ayaan Ilimahayga ugala hadlaan ka badbaadinta internet-ka iyo cago-jugleynta isgaarsiinta dheereysa?**

Arrinta ugu muhiimsan ee waalidiintu ay qaban karaan waa in ay ilmahooda kala sheekeystaan badbaadoos ku saabsan online-ka, dibna ay dhegeystaan warcelinta ilamaha. Waxaad kala sheekeysan kartaa sida loo sameeyo hab gaar idiin ah iyo waliba habdhaqanka fiican ee aad ka rajeyneyso isicmaalida ugu haboon online-ka. Waxaad ka caawisaa ilmahaaga siduu u fahmi lahaa waxa uu yahay macluumaadka khaaska ee aysan ku daabici karin online, sida furaha sirta ah (password), lambarada telefoonada, cinwaanka ama macluumaadka ee qoyska. Waxaad ilmahaaga weydiisataa in uu kula socodsiiyo ama qof weyn u sheego haddii uu online-ka kala kulma cidhiidhi iyo wax aysan jecleysan. Waxaad kala shaqeyn kartaan ilamahaaga sidii aad u wada sameyn lahaydeen qorshe nabadeed oo qoraal ah, kaasi oo ay ku jiraan istaraatiijiyado gaar ah wixii ay aad sameyn lahaydeen haddii ay dareen ka qaataan waxa ay kala kulmeen online-ka.

## **Maxaa kale ee aan qaban karaa?**

Aqoonso cida ay yihiin saaxiibadiisa online-ku. Waa in aad si joogto ah ula socotaa boggaga uu booqdo iyo hawlaha online-ka ku sameeyo adigoo akhriyaya faalooyinka. Haddii ilmahaaga loo cago-jugleeyo waxaad mararka qaarkood sameyn kartaa inaad ka xannibto ama aad masaxdo magaca isticmaalaha ama cinwaanka email-ka. U sheeg ilmahaaga in aanu u jawaabin fariimaha aan habooneyn ama muuqaalada la soo dhigay, waxaanad ka caawisaa inuu keydiyo cadeynaha. Waxaad hubisaa in ay ogsoon yihiin waxa aad ka fileysaa inay tahay in aanay ka qeybqaadan waxyaabaha akhlaaqda aan ku fiicneyn, ee ay ka jiraan u gudbinta ama “jeclaanshaha” faalooyiinka.

## **Sidee ayaan u dacweeyaan xadgudubka ama waxyaabaha aan habooneyn ee online-ka?**

Baraha bulshadu ku xidhiidho sida Facebook, Instagram, Twitter, Kik iyo Vine waxay leeyihiin meelo aad ka dacweyso wixii handadaad ah, xadgudub ama waxyaabo aan habooneyn. Waxaad ilmahaaga kala shaqeyn kartaa inuu wargeliyo wixii dareemo ah ee baraha bulshadu ku xidhiidho weydiisano inuu hayo wixii uu ka saaray. Waxaad kale oo aad ka gargaari kartaa ilmahaaga inuu ku sameeyo dib-u-eegis isagoo habeynaya farsamo u gaar ah oo iyo qalabkii ka xanibayey inay u soo gudbaan waxyaabahaasi. Waa in aad feejignaan dheeraad ah u yeelato waxyaabaha la soo dhigo ee aan magacu la socon iyo cidii soo dirta ama aan lahayn dariiq dhib yar oo loo dacweyn karo waxyaabaha aan habooneyn. Tusaale ahaan “Ask.fm” waa bog inta badan loo isticmaalo waxyaabaha aan habooneyn ee faalooyinka handadaada.

## **Muxuu Dugsigu ka qaban karaa?**

Caga-jugleynta Isgaarsiinta Dheereysaa waxay dhici kartaa waqti kasta, 24-ka saacadood maalintii. Masuuliyada ugu horeysa ee ardeyda, qoysaska iyo bulshadu waa inay wargeliyaan sheegaana dhibaatooyinka hanjabaada online-ka. Iskuulku masuul kama aha ka hortegida iyo ka jawaabcelinta dhammaan cago-jugleynta 24 saacadood ee maalinta. Waxaa jira xayiraado xaddeyn kara awooda dugsiga iyo awooda ay ku baadhayaan cidii la handaday iyo cida ka falcelineysa hanjabaadaasi. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay leeyihiin siyaasad cad oo ka soo horjeeda handadaada kuna wajahan cago-jugleynta dugsiga. Waalidiintu waxay dugsiga wargelin karaa wixii handadaad ah ee ka dhaca waqtiga dugsiga lagu sugan yahay maamulka iskuulka. Haddii hanadaadu ay ka dhacdo iskuulka, waxaa lagu sameyn karaa baadhitaan haddii loo baahdo maamulka dugsigu waxay ka qaadi doonaan tallaabada ugu haboon. Waxaa intaas dheer, iskuulku wuxuu iskaashi la leeyahay bulshada isagoo siin kara qoysaska ilaha macluumaadka ay u baahan yihiin.

## **Goorma ayaan wargeliyaa booliska ama dugsiga?**

Hadii ay sii socoto cago-jugleynta, waad xafidi kartaa cadeymaha adigoo habka loo dacweynaya ka caawinaya ilmahaaga. Waxaad weydiisaa ilmahaaga inuu kuu sheego haddii fariin online ah ama muuqaal ay cabsi galisay ama dhaawacday dareenkiisa. Haddii aad u baqato amniga ilmahaaga waxaad la xidhiidhaa booliiska. Wargeli booliiska dhacdooyinka handadaada ama cago-jugleynta ee maalintii ka dhaca meel ka baxsan iskuulka. Haddii cago-jugleynta isgaarsiinta ee dheereysaa ay dhacdo waqtiyada dugsiga la joogo maalintii, waqtiyada hawlaha iskuulka soo qabanqaabiyey lagu gudo jiro, ama farogelin xoogan nawaaxiga iskuulka ah waa in aad wargelisaa dugsiga. Iskuulku wuu kula shaqeyn doonaa adiga, ilmahaaga iyo haddii ay suurtagal tahay ciidamada amniga qaabilsan inay baadhitan ku sameeyaan waxa aad tabaneyso.

Fahamsanow dariiqooyinka aad ula hadli karo ilmahaaga, u kormeeri karto hawlhooda online-ka iyo sameynta wargelin degdeg ah cago-jugleynta isgaarsiinta dheereysa waxay qaadaneysaa dariiq dheer oo aad ku hubineyso in adiga iyo ilmahaagu ay ka war hayaan dhibaataada ballaadhan ee uu leeyahay waxyaabaha internet-ka ku jiraa. Waxyaabo dheeraad ah oo gargaar kuu noqon kara dhinaca badbaadada internet waxaad tegtaa bogga Dugsiyada Dadweynaha Portland qeybta Farsamada "Parent Resources" ee halkan: <http://www.pps.k12.or.us/departments/information-technology/1242.htm>

: